## SUURAT AN-NAAS:

***Magaca Eebe yaan ku bilaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista.***

***1. Waxaad dhahdaa "Nabiyow" waxaan ka magangeley Eebaha dadka barbaariya.***

***2. Ee dadka xukuma.***

***3. Ee ah Ilaaha dadka.***

***4. Sharka " iyo xumaanta" waswaasiyaha qarsoon.***

***5. Ee waswaasiya laabta " Qalbiga" dadka.***

***6. " Kuwaas wax waswaasinaya" oo ah jinni iyo insiba.***

Qur'an 114:1-6

**Sharaxa Suuradaan:**
Suuraddan waxay sheegi in Eebe awooda leh laga magan galo xumaanta iyo sharka kuwa wax dhibay waxna waswaasinaya, xumaanloogana ah, ama jinni ha ahaadeen ama insi ha ahaadeen. Waxaa dhab ah in had iyo jeer ay jiraan dhibayaal warxumatashiila, dadka ka qasa diintiisa, aakharadiisa, iyo noloshiisaba. Hadaba waa in kuwaas Eebbe laga hoos gala, lagana digtoonaada.

Abuu darri waxaa laga wariyay inuu yidhi: " Waxaan u imid rasuulkii Eebe ' Naxariis iyo nabadgeliyo korkiisa Eebe ha yeelee' oo masjid jooga markaasaan fariistay wuxuuna yidhi " Abuu darri ma tukatay? Waxaan idhi maya, wuxuu yidhi istaag oo tuko, wuxuu yidhi waan istaagay oo waan tukaday, waana fariistay, markaasu yidhi " Abu darri ka magan gal Eebe sharka shayaadiinta insiga iyo jinniga. Markaasuu yidhi waxaan idhi: Rasuulkii Eebow insigu ma shayaadiin buu leeyahay? Markaasuu yidhi: " Haa".

Waxaa wariyay Imaam Ahmad iyo Ibnu Maajah.